

Wararkii ugu Dambeeyey ee Horumarinta Qalabka Waxbarashada Loo Isticmaalo ee Xilliga Jiilaalka 2024

Mashruucii rakibaada Kumbuuyataradda goobaha waxbarashada dugsiyada ee Maaligalintii sanadkii 2020 wuxuu dhammaaday isla sanadkii 2020, iyada oo labo iyo toban dugsi oo isku [koox ah](#) ayna ku jiraa ilaa hadda 64 dugsi. Mashruucan waxaa ka mid ah in lagu rakibo fasal kasta kumbuuyatarada waaweyn ee loo yaqaan (Desktop) oo cusub loona addeegsanayo dhinaca waxbarashada. Kooxdu waxay bilaabi doonaan rakibaadda [kooxdii saddex iyo tobnaad ee dugsiiga Maalgalinta 2020 iyo sii wadista sida ku qorsheysan jadwalka](#). Rugaha Kumbuuyatarada wax lagu baranayo iyo mashruuca bedelaada shaashadaha kumbuuyatarada ayey kooxda hadda ka shaqeyneysaan ee Maalgalintii 2020 kooxda saddex iyo tobnaad ee dugsiiga oo ay ka midka yihiin dugsiyada Rosa Parks, Astor, Grout, Vernon, iyo Whitman.

Waxaa hadda gacanta lagu hayaa hawshii rakibaadda Mashruuca Horumarinta Tiknoolajiyada Waxbarashada Maalgalinta 2020 ee Kooxda Dugsiyada saddexaad, waxaana ka mid ah dugsiyada ku yaala dhismaha Pioneer Youngson, Mashruuca Waqtiga Kala Gurka Bulshada Koonfur-Bari- Green Thumb, iyo Mashruuca Waqtiga Kala Gurka Bulshada - King Annex ee dhismaha dugsiiga Dr. Martin Luther King Jr., iyo Dugsiiga Hoose ee Chapman. Horumarinta tiknoolajiyada fasalka waxaa ka mid ah in macallimiinta darbiyada fasalada loogu rakibay telefoon, shaashada sabuurada laysarka ku shaqeysa iyana gidaarka fasalka lagu rakibo, iyo qalab macallimiinta ay fasalka jooga ay addeegsadan in fariintoodu qof kastaa ku sugan qolka ay maqli karto. Waxaa fasalka jimicsiga(gym) dugsi kasta lagu rakibi doonaa telefoon. Sidoo kale waxaa fasal kasta lagu rakibi doonaa Wi-Fi iyo iyada oo kor loo qaadi doono isku-xidhaha khadka faybarka si loo kordhiyo xawaaraha isku xidhka dugsiiga.

Waiga marxaladdani ugu ballaaran waa barnaamijka baahiyaha gaarka ah. Ka qeybgalayaasha 77% laga diiwaangaliyey waa barnaamijka baahiyaha gaarka ah, kooxda dugsigani waxay leeyihiin arday ay isku-geyntoodu ay dhan tahay 656+ oo ay ka mid yihiin 84% arday kuwaasi oo ka imanaya bulshooyinka taariikh ahaan aan heli addeegyadii ay u baahnaayeen in la siiyo. Intaas waxaa dheer, hal dugsi ayaa markii la qiimeeyey gaaray derejada TSI. Dhismayaasha kooxda dugsigani celcelis ahaan waxay cimrigoodu jiraa 78 sanno.